

Qaab soo galeetinimo cusub oo loogu talo galay shaqaalaha diinta

Sibtembar 28, 2022

Alberta waxay kula biiri doontaa gobolada kale balaarinta barnaamijkeeda socdaalka si ay u aqbasho codsiyada ka imaanaya shaqaalaha diimaha kuwaasoo uga adeega bulshooyinkooda diin ahaan iyo caqiido ahaan.

Alberta waxay hoy u tahay kumanaan bulshooyin diimeed oo kasoo kala jeeda dhaqamo diimeed oo kala duwan, kuwaas oo intooda badan ku tiirsan wadaad iyo shaqaale diimeed oo kale kuwaas oo ka imaada dibadda si ay u taageeraan baahiyahooda cibaadada, diinta iyo caqiidada. Si kastaba ha ahaatee, wakhti xaadirkaan majirto qaab cad oo shaqaalaha noocaas ah ay ku raadsan karaan kuna heli karaan degenaansho Alberta gudaheeda ah, taasoo micnaheedu yahay in badan oo kamid ah shaqaalaha diimaha ee caanka ka ah xiriir dhowna la leh bulshooyinkooda ay ku khasbanaanayaan in ay waddanka iskaga tagaan kaddib marka degenaanshahooda kumeelgaarka ah uu dhamaado.

Si loo xaqiijiyo in ururada diimuhu awood u yeeshaan in ay jamaacooyinkooda si wanaagsan ugu adeegaan, dowladda Alberta waxay qaadaysaa tallaabooyin si u soo jiidato shaqaalahaan kuwaasoo hoos imanaya Alberta Advantage Immigration Program.

Xirfadleyaasha diimaha ee dhawaantan yimid waxay hadda u qalmaan in ay codsadaan Alberta Opportunity Stream, Alberta Express Entry Stream iyo Rural Renewal Stream si ay ula shaqeeyaan ururada diimaha si rasmi ahna u dagaan gobolka. Codsaduhu waa in uu dalab shaqo ka haysto urur diimeed Alberta degen

uuna buuxiyo shuruudaha jira ee barnaamijka, oo ay kamid yihiin shuruudaha luuqadda, waxbarashada iyo mushaharka.

Isbadaladu waxay Alberta kala mid dhigayaan gobolada kale, oo ay ka mid yihiin British Columbia, Saskatchewan, Manitoba and Ontario, kuwaas oo shaqaalaha diimaha u oggol in ay codsadaan barnaamijyadooda soo galeetinimo ee gobolka.

Dowladda Alberta waxay sii wadi doontaa in ay la socoto suuqa dadka xoogsatada ah isbadalana ku samayso Alberta Advantage Immigration Program si loo xaqiijyo in uu taageerayo dhaqaalaha Alberta iyo bulshooyinka.

Xaqiiqooyin kooban

- Alberta Advantage Immigration Program waa barnaamij federaalka iyo gobolka ka dhexeeya kaasoo shakhsiyaadka u doorta degenaansho rasmi ah oo ay ka helaan Alberta haddii ay leeyihiin xirfadaha ay ku buuxinayaan shaqooyinka bannaan ama ay qorshaynayaan in ay wax ka iibsadaan ama ka bilaabaan ganacsi gudaha Alberta.
- Shaqaalaha diimuhu waxay codsan karaan barnaamijkan oo hoos imanaya Alberta Opportunity Stream, Rural Renewal Stream and the Alberta Express Entry Stream haddii ay buuxiyaan shuruudaha u qalmidda ee hadda jira.
 - Alberta Opportunity Stream waxaa loogu tala galay shaqaalaha ajanabiga ee kumeelgaarka ah ee ka shaqeeya gudaha Alberta kana hela shaqo wakhti buuxda ah shaqo galiye reer Alberta ah oo ah shaqo uu uqalmo.
 - Alberta Opportunity Stream waxaa loogu tala galay shakhsiyaadka haysta dalab shaqo oo bulshada ka socda si ay ugu shaqeeyaan mid kamid ah bulshada miyiga ee Alberta.
 - Alberta Express Entry Stream wuxuu Alberta u oggolaanayaa in ay magacowdo tartameyaasha u qalma ee ka socda nidaamka federaalka ee Express Entry kuwaas oo muujiya xiriir adag oo ay la leeyihiin Alberta ama ka shaqeeya shaqo taageeraysa horumarka dhaqaalaha Alberta iyo kala duwanaanshaha.

Macluumaadka la xiriira

- [Alberta Advantage Immigration Program](#)
- [Qorshaha Soo Kabashada ee Alberta](#)



Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.